

Cudurka Meningococcal iyo Tallaalka

Waa maxay Cudurka Meningococcal?

- Waa cudur ay keento bakteeriyo ay dad badani ku qaadaan dhuunta ama sanko iyagoon dareemin xanuun.
- Wuxuu ku faafaa xiriirka dhow ee toos ah. Tusaalooyinka waa dhunkashada, qufaca ama wadaagga waxyaabaha sida cuntada, cabitaanka, iyo qalabka muusiga.
- Dadku waxay bukoodaan marka bakteeriyadu gasho dhiigga iyo dareeraha kale ee jidhka.
- Tani waxay horseedi kartaa barar maskaxeed, dhaawac maskaxeed iyo mararka qaarkood dhimasho dhowr saacadood gudahood ah.

Maxaa ku jira tallaalka Meningococcal C-ACWY?

- Tallaallada meningococcal waxay ka caawiyaan inay ka difaacaan caabuqyada halista ah ee ay keento bakteeriyada meningococcal. Tallaalku wuxuu jirkaaga u diyaariyaa difaac (antibodies) oo kaa ilaaliya cudurka. Tallaalkani wuxuu ka difaaca afar nooc oo bakteeriyo ah oo sababa cudurka qoorgooyaha (meningitis).

Maaddooyinka tallaalka Meningococcal	Halkee kale ayaa laga heli karaa waxyaabahan?
Tetanus toxoid ^{1,2}	Tallaalada caruurnimada ee kale
Borotiinka Corynebacterium diphtheriae CRM197 ³	Tallaalada caruurnimada ee kale
Sodium chloride ^{1,2,3}	Jidhka aadanaha, milix
Sodium acetate ²	Cuntooyin badan
Sodium phosphate ³	Daawooyinka caloosha jilciya
Potassium dihydrogen phosphate ³	Cuntooyin badan
Trometamol ¹	Waxyaabaha la isku qurxiyo, daawooyinka
Sucrose ^{1,3}	Sonkor

¹ Walaxda tallaalka Nimenrix®

² Walaxda tallaalka Menquadfi®

³ Walaxda tallaalka Menveo®

Talaalkani ma yahay badbaado?

- Haa, tallaalka Meningococcal C-ACWY wa badbaado. Waxaa lagu isticmaalayey rugaha tallaalka Caafimaadka Dadweynaha Ottawa ilaa 2007-dii.
- Kama qaadi kartid cudurka meningococcal dhanka tallaalka.

Sideen uga ilaalin karaa nafteyda Cudurka Meningococcal?

- Qaado tallaalka.
- Qiyaas tallaalka Meningococcal C-ACWY ayaa lagula talinayaa dhammaan dhallinyarada marka ay gaaraan 12 sano ama ka weyn, xitaa haddii ay hore u qaateen qiyaas tallaalkan ah iyagoo carruur ah.
- Ha wadaagin waxyaabaha afka taabta sida cuntada, cabitaannada, cadayga iyo maacuunta wax lagu cuno.
- Gacmahaaga si fiican oo joogto ah u dhaq.
- Ka fogow inaad si dhow ula joogto dadka leh calaamadaha cudurka.

Waa maxay dhibaatooyinka ka imaanaya tallaalka?

Ugu Caadisan	Caadi ahaan ka yar	Aad dhif u ah iyo Halis
Casaan, xanuun iyo/ama barar goobta, gaar ahaan xilliga 24 saac ee ugu horreeya	Muruq xanuun, Madax xanuun, dareen aan fiicnayn iyo/ama qandho yar	Falcelin-xasaasiyad daran oo keenta; dhibaato neefsasho, barar wejiga ama afka, cuncunyo
Daawaynta: Baraf mari aagga aad ka qaadatay tallaalka iyo/ama qaado acetaminophen (tusaale Tylenol®)		Kalkaaliyayaasha caafimaadka waxaa loo tababaray daaweynta falcelinta daran

Is barbar dhig khataraha – cudurka ama tallaalka?

Khatarta Cudurka	Khatarta Talaalka
Maskaxda oo bararta (meningitis) taasoo keenta maqal la'aan, faalig ama qalal	Gacan xanuun: 6 ka mid ah 10 qof Madax-xanuun ama dareen daal: 6 ka mid ah 10kii qofba
Caabuqa dhiigga oo keena shoog iyo hawigabka xubnaha Caabuqyada kale ee sambabada, kala goysyada, lafaha, wadnaha iyo maqaarka Dhimasho – 1 ka mid ah 10kii xaaladood oo daran	Dareen-celin halis ah ayaa aad dhif u ah

Waxaan horey u qaatay tallaalka meningococcal

- Waxaa laga yaabaa inaad hore u qaadatay tallaalka meningococcal (tusaale Men-C-C ama NeisVac-C® ama Menjugate®) xagga dhallaanka ka ilaaliya **hal** nooc oo bakteeriyada ah. Tallaalkan Men-C-ACWY wuxuu sidoo kale ka difaaca saddex nooc oo dheeraad ah oo bakteeriyada keenta qoorgooyaha (meningitis).
- Tallaalka Meningococcal C-ACWY wuxuu ka ilaaliyaa 80% ilaa 85% xagga dhallinta cudurada ay keento afar nooc oo bakteeriya ah.

Waa inaad qaadatay hal qiyaas oo tallaalkan ah si aad dugsiga u dhigato. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudaha tallaalka dugsiga, fadlan booqo [Ottawapublichealth.ca/immunization](https://www.ottawapublichealth.ca/immunization).

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo: <https://www.ontario.ca/page/vaccines-children-school>